

## **Kaadhka Firfircoonida**

Kaadhka firfircoonida waqtiga firaaqada (Kaadhka Firfircoonida) waxa loogu talagalay dhammaan carruurta iyo dhallinyarada deggan Tromsø ee da'doodu tahay 6 ilaa 18 sanno. Kaadhka Firfircoonidu waxa uu bixinayaa ilaa 800 karoon oo ka mid ah lacagta ku baxaysa firfircoonida waqtiga firaaqaha ah. Kaadhka waxaad u isticmaali kartaa in aad ku bixisid lacagta lagaa rabo markaad ka qaybgalaysa firfircoonida waqtiga firaaqaha ah ee abaabulan ee ka mid ah ciyaaraha/isboortiga iyo dhaqanka – adiga ayaa dooranaya waxaad rabto.

Si aad u codsato Kaadhka Firfircoonida, waa in aad magac ka samaysatid [tromso.friskus.com](http://tromso.friskus.com). Halkaas waxaad ka helaysaa macluumaad ku saabsan kooxaha iyo ururrada, waxaad dooran kartaa waxa aad ku isticmaalaysa Kaadhkaaga Firfircoonida ama ka ilmahaaga.

[Halkan waxaad ka arki kartaa khariidad muujinaysa firfircoonida ay carruurta iyo dhallinyarada Tromsø ka qaybgeli karaan.](#)

## **Waxyaalahee ayuu Kaadhka Firfircoonidu bixinayaa lacagtooda?**

Kaadhka Firfircoonidu waxa uu halkii ilmo lixdii biloodba mar ka bixinayaa ilaa 800 karoon oo ah lacagta ka qaybgalka hal ama dhowr firfircooni. Lacagta tababbarka, shatiga ciyaartoyda, lacagta xubinnimada iwm ayaa ku jira nidaamkan isla markaana waa in firfircoonidu ahaato mid abaabulan oo soconaysa ugu yaraan 8-10 jeer sannadkii. Kaadhka Firfircoonidu ma bixiyo safarka fasaxyada, safarrada kooxeed ee dhixitaanka ah ama tartannada. Kaadhka Firfircoonida looma isticmaali karo shaleemada, bowling ama firfircoonida kale ee dadku iskood isu abaabuleen. Kaadhku ma bixinayo lacagta lagu iibsanayo qalabka ciyaaraha, qalabka muusiga iyo wixii la mid ah.

## **Yaa heli kara Kaadhka Firfircoonida?**

Carruurta iyo dhallinyarada deggan degmada Tromsø ee jira da'da 6 – 18 sanno jir ayaa heli kara Kaadhka Firfircoonida. Kaadhka waxa leh qofka la siiyay, ilmaha ayaana dooranaya nooca firfircoonida ay rabaan in laga caawiyo. Walaalaha mid kasta waxa la siinayaa kaadh u gaar ah. Lacagta ku jirta Kaadhka Firfircoonida waxa leh ilmaha la siiyey oo lacagta kaadhka oo looma wareejin karo walaalaha kale. Kaadhka Firfircoonidu waxa uu shaqaynayaa laga bilaabo sannadka ilmuhu noqonayo 6 sanno ilaa sannadka uu noqonayo 18 sanno jir.

## **Sida loo codsado iyo waqtiga ugu dambaysa ee la codsan karo**

Si aad u codsato Kaadhka Firfircoonida, waa in aad magac ka samaysatid [tromso.friskus.com](http://tromso.friskus.com). Halkaas waxaad ka helaysaa macluumaad ku saabsan kooxaha iyo ururrada, waxaad dooran kartaa waxa aad ku isticmaalayso Kaadhkaaga Firfircoonida ama ka ilmahaaga. Marka aad diiwaangeliso KID-lambarka ku yaalla faktuurada lagu soo diray oo aad bilowdid Kaadhka Firfircoonida, ayaa si toos ah 800 karoon looga goynayaa lacagta faktuurada ku qoran, si aad u bixin kartid inta soo hadhay. Degmada Tromsø ayaa lacagta Kaadhka Firfircoonidaa lagu bixiyo toos ugu diraysa ururka.

- Gal [tromso.friskus.com](http://tromso.friskus.com). Taabo «LOGG INN» oo ku taalla kor dhanka midig si aad u samaysatid magac/akoon kuu gaar ah. Ku qor lambarka telefoonka moobeelkaaga oo taabo «KOM I GANG». Samayso fure sir ah, ka dibna diyaar ayaa tahay.
- Soo qaado Kaadhka Firfircoonida, raadi meesha firfircoonida ka masuul ah (koox ama urur) oo diiwaangeli KID-lambarka ku yaalla faktuurada ay kuu soo direen.
- Ilaa 800 karoon ayaa lixdii bilood ba laga goynayaa lacagta faktuurada ku qoran. Inta kale lacagta adiga ayaa bixinaya oo siinaya cidda firfircoonida ka masuul ah.

**Deyrtan 2021 waxa codsiga la soo diri karaa ugu dambeyn: 30.11.2021.**

[Haddii aad hore u bixisay lacagtii firfircoonida, halkan ayaad ka soo degsan kartaa foomka lacag soo celinta.](#)

Haddii aad meesha ka weydo kooxdaada ama ururkaaga, la xidhiidh naadigaaga ama annaga nala soo xidhiidh. Annagaa ayaa markaa iyaga diiwaangelin doona.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan Kaadhka Firfircoonida waxaad e-boos u soo diri kartaa [fritidskortet@tromso.kommune.no](mailto:fritidskortet@tromso.kommune.no)

### **Qofka lala xidhiidhi karo**

Lise Fransiska Valle

Telefoon: 94 19 40 89.